Somali Public Agenda

Faallo Kooban 17

Abriil 2022

Soo koobid

Gobolka Gedo ayaa muddooyinkan dambe noqday gobol udub-dhexaad u ah doodda siyaasadda Soomaaliya. Magaalada Garbahaareey ee xarunta gobolka Gedo ayaa loo asteeyey in lagu qabto doorashada 16 kursi ee golaha shacabka ah. Balse, Guddiga Hirgelinta Doorashada ee Heer Federaal ayaa soo saaray warqad uu deegaan doorashada ugu wareejinayo degmada Ceelwaaq 14-kii Abriil 2022, oo ahayd maalintii magaalada Muqdisho lagu dhaariyay inta badan xildhibaannada baarlamaanka 11-aad. Hannaan doorasho oo isbarbar socday ayaa waxaa kasoo baxay 32 xildhibaan oo lagu kala doortay Ceelwaaq iyo Garbahaarey. Kahor inta aysan bilaabmin doorashada dadban ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya, Gedo waxay noqotay goob halbowle u ah khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Jubaland. Inkastoo gobolka uu hoos tago maamulka Jubaland, haddana hal degmo oo keliya (Ceelwaaq) oo ka tirsan Gedo ayaa maamulka Jubaland uu hadda gacanta ku hayaa. Qormadan waxaa lagu eegayaa sida ay Gedo u noqotay goob sal u ah khilaafka siyaasadda Soomaaliya. Waxa ay warbixintu falanqeyneysaa gacan ku heynta dowladda federaalka ee Gedo, dhibaatooyinka iyo caqabadaha ku xeeran qabsoomidda doorashada Gedo, iyo waxyaabaha keenay khilaafka Gedo: oo ay ka mid yihiin tabashooyin aan la xallin, joogitaan la'aanta hay'ado amni ee heer dowlad goboleed ah, iyo waxyaabaha damaca syaasadeed uu keenay. Qoraalku waxa uu soo bandhigayaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2022 Somali Public Agenda

Damac Siyaasi mise Tabasho Bulsho: Dhibaatada Gedo

Xasan Guuleed

Hordhac: Bilowgii Loolanka Dowladda Federaalka iyo Jubaland

Dib-u-qaabeynta dowladnimada Soomaaliya ee socoday tobankii sano ee lasoo dhaafay waxaa ka dhashay dhismaha dowlad-goboleedyo cusub iyadoo la isku darayo ugu yaraan labo gobol. Dolwad goboleedka Jubaland waxa uu ka kooban yahay Jubada Hoose (oo ay ku taalo caasimadda maamulka ee Kismaayo), Jubada Dhexe (oo inta badan ay gacanta ku hayaan al-Shabaab), iyo Gedo. Maamulka Jubaland ee uu hoggaamiyo Madaxweyne Axmed Maxamed Islaam 'Madoobe' ayay ku adkaatay in nidaamka maamulkiisa uu ku baaho guud ahaan deegaannada hoos yimaada maamulkaasi sababo la xiriira dagaalka kala dhexeeya al-Shabaab, xaaladda guud ee amniga, faragelin dibadda ah oo kaga imaanayay dhinacyo kala duwan, iyo kala qeybsanaanta beelaha ee gobollada maamulka. Kala qeybsanaanta iyo khilaafka xoogan ee ka dhex aloolsan dowladda federaalka iyo maamulka Jubaland ayaa si weyn uga qeyb qaatey loolanka gobolka Gedo oo xuduud la wadaaga dalalka Kenya iyo Itoobiya.

Hadal uu jeediyay Ogosto 2018, wasiirkii hore ee amniga Jubaland Cabdirashiid Xasan Cabdinuur "Janan" oo ah nin ku xoog badan gobolka Gedo ayaa uga digay dowladda federaalka in aysan ku khaldin Jubaland, maamulka ay deriska yihiin ee Koonfur Galbeed wakhtgaas oo ay socotay doorashada madaxweynaha Koonful Galbeed. Waxa uu sheegay in cid kasta oo diyaar u ah in ay Kismaayo ka ololeyso iyadoo raaceysa nidaamka Jubaland ay soo dhaweynayaan. "Laakin hadii aad u imaaneyso in aad faragelin ku sameyso Jubaland, kama labalabeyn doonno in aan ku dhoofinno." Hadalkaas waxa uu jeediyey wakhti ay doorasho ka socotay magaalada Baydhabo ee xarunta kumeelgaarka ah ah maamulka Koonfur Galbeed. Halkaa, dowladda federaalka waxay si weyn ugu lug lahayd doorashadii madaxtinimo ee keentey in lagu doorto musharaxa ay door bidayeen, Cabdicasiis Xasan Maxamed (Laftagareen), oo Baydhabo ka dhacdey dhamaadkii sanadkii 2018. Maadaama doorashada Jubaland ay sidoo kale soo dhaweyd, maamulka Jubaland ayaa dareensanaa in hannaan lamid ah ay Koonfur Galbeed ka sameysay dowladda federaalka ay ka dhici karto Kismaayo haddii aanay u diyaar garoobin.

Wasiirkii Amniga Jubaland ee xilligaas, Cabdirashiid Janan, ayaa 31-kii Ogosto 2019 lagu xiray garoonka diyaaradaha ee Aadan Cadde, isagoo lagu eedeeyay inuu galay dambiyo ka dhan ah bini'aadamnimada. Kadib xarigiisii xilli uu kusii jeeday Addis Ababa, dowladda federaalka waxay billowday in ay si degdeg ah ula wareegto maamulka gobolka Gedo (International Crisis Group, 2020). Wafdi ka kooban guddoomiyeyaasha degmooyinka gobolka Gedo ee uu hoggaaminayo Maxamed Cabdullaahi Gardhuub oo xilligaas ahaa guddoomiyaha degmada Luuq Ganane ayaa loo qaaday magaalada Addis Ababa. Gardhuub ayaa u sheegay BBC Somali in ay xiriirka u jareen Jubaland, islamarkaana ay ku heshiiyeen in ay u hoggaansamaan dowladda federaalka ee Muqdisho, islamarkaana loo oggolaado in ciidamada dowladda federaalka ay kasoo degaan Dooloow inta laga helayo maamul loo dhan yahay oo Jubaland laga dhiso. Gardhuub ayay mar dambe is khilaafeen dowladda federaalka, wuxuuna ku biiray garabka Cabdirashiid Janan oo ku sugnaa duurka.

May 20, 2020, dowladda federaalka ayaa beddeshay dhammaan guddoomiyeyaashii degmooyinka gobolka Gedo, waxaana guddoomiyaha gobolka loo magacaabay Cismaan Nuur Xaaji (Macalimuu) kaddib markii ay gacan adag ku qabatay gobolka marka laga reebo Ceelwaaq oo ilaa hadda hoos tagta maamulka Jubaland (degmada kaliya ee gobolka Gedo oo ay maamusho Jubaland). Magacaabistan ayaa waxaa sameeyay wasiir ku xigeenkii hore ee arrimaha gudaha Jubaland Cabdiraxmaan Maxamed Xuseen oo uu xilka ka qaaday Madaxweynaha Jubaland Axmed Madoobe. Hase yeeshee, dowladda federaalku waxay u isticmaashay si ay u sharciyeyso magacaabisteeda siyaasadeed.

Iska horimaadyo hubeysan oo ka dhacay Gedo iyo ku lug lahaanshaha Jilayaasha Gobolka

Janaayo 28, 2020, Cabdirashiid Janan, Wasiirka Amniga Jubaland, ayaa ku guuleystay inuu si qarsoodi ah uga baxsado xabsiga Muqdisho, wuxuuna u cararay magaalada Kismaayo (International Crisis Group, 2020) halkaasoo madaxweynihiisa Axmed Madoobe dib loogu doortay doorasho muran badan ka dhashay. Cabdirashiid Janan oo toddobaadyo ku sugnaa dalka Kenya ayaa dib ugu laabtay magaalada Kismaayo si uu u qorsheeyo sidii

uu Jubaland ugusoo celin lahaa gacan ku heynta gobolka Gedo, isagoo gacan ka helaya Kenya oo xiriir dhow la leh maamulka Jubaland. Mudadii koobneyd ee uu ku sugnaa Kenya, Amnesty International ayaa ka codsatay madaxda Kenya in lasoo xero Cabdirashiid Janan, laguna wareejiyo dowladda federaalka. Sikastaba ha ahaatee, Kenya ma aysan dhegeysan codsiga Amnesty International sababtoo ah Kenya waxay rabtay in Janan uu dagaal la galo dowladda federaalka ee Gedo ku sugan si loo yareeyo cadaadiska saarnaa Jubaland (Amnesty International, 2020).

Cabdirashiid Janan oo muddo bilooyin ah diyaar garow ugu jiray magaalada Kismaayo ayaa waxaa u suurtagashay ugu dambeyn in uu xero ciidan ka sameysto magaalada xuduudka ku taalla ee Mandheera. Bishii Maarso 2020, Cabdirashiid ayaa la dagaallamay ciidamada dowladda federaalka ee ku sugan xadka u dhexeeya Kenya iyo Soomaaliya. Dagaalka ayaa duhurnimadii ka billowday duleedka magaalada Balad-Xaawo iyadoona xoogga dagaalka awgeed ay adkaatay tirinta khasaaraha ka dhashay (Cabdishakuur, 2020). Sikastaba ha ahaatee, dad badan ayaa qaxay, gaar ahaan dadkii ku noolaa xuduudda. Iskuuladii iyo ganacsiyadii ayaa hakad galey. Sidoo kale, markii uu dagaalka yaraaday ayaa warbaahinta Kenya waxay sheegtay in dhowr madfac ay ku dhaceen iskuullo iyo guryo. Shacabka Mandheera ayaa ugu baaqey dowladda Kenya in ay joojiso magan-galyo siinta qofka baxsadka ah iyagoo dhigey dibad-bax lagu baahiyey warbaahinta Kenya.

Diseembar 15, 2020, dowladda federaalka ee Soomaaliya waxay xiriirka diblomaasiyadeed u jartay Kenya iyadoo ku eedaysay “xad-gudub joogto ah” in ay ku hayso madax-banaanideeda. Soomaaliya ayaa ku amartay diblamaasiyiinta Kenya inay dalka kaga baxaan muddo 7 maalmood ah (Aljazeera, 2020). Ku dhawaaqistaan ayaa kusoo aadey xilli Madaxweynaha Kenya Uhura Kenyatta uu martigelinayay Muuse Biixi Cabdi, Madaxweynaha Jamhuuriyadda iskeed ugu dhawaaqday madaxbannaanida ee Somaliland. “Kenya waxay sii waddaa faragelinta ay ku hayso arrimaha siyaasadda gudaha, wayna iska dhega tirtay baaqyadii hore ee ahaa in ay joojiso ku xad-gudubka madax-banaanideenna,” ayuu yiri Wasiirka Warfaafinta Soomaaliya Cismaan Dubbe oo la hadlay Telefishinka Qaranka Soomaaliyeed.

Qoraal kale oo erayo adag lagu qorey oo ay Soomaaliya faafisay toddobaadyadii u dambeeyay iska hor imaadka ee March 2020 ayay Soomaaliya ku eedaysay Kenya inay gabbaad siisey nin baxsad ah. Sidoo kale, Soomaaliya waxay u gudbisay dacwo ku saabsan faragelinta Kenya ay ku hayso arrimaha Soomaaluya urur-goboleedka IGAD (Aljazeera, 2020). Taasi waxay keentay in IGAD ay shir aan caadi ahayn ku qabato dalka Jabuuti, kaasoo looga arrinsanayo xiisadaha ka taaganaa gobolka gaar ahaan muranka u dhexeeya Soomaaliya iyo Kenya. Kulanka oo ahaa mid arrimo badan looga hadley ayaa markii uu soo idlaaday waxaa ay IGAD u saartay guddi xaqiiqo raadin ah oo u kuur gala sidii ay wax u dheceen. Guddiga, sikastaba ha ahaatee, ma helin wax caddaynaya in Kenya ay gabaad siiso qof baxsad ah. Guddiga ayaa markii hore tagay magaalada Nairobi, kadibna waxa ay ugasii gudbeen Mandheera, si ay usoo baaraan in ay jiraan xeryo laga sameeyay gudaha xuduudka Kenya oo ay ku sugnaayeen laguna tababarayay maleeshiyaad ka amar qaata Cabdirashiid Janan. Sikastaba, sida ku cad warbixintii ugu dambeysay ee guddiga, ma aysan helin xeryo ciidan oo loo isticmaaley in lagu qalqal geliyo ama lagu farageliyo arrimaha Soomaaliya.

Soomaaliya waxa ay diidday natiijada guddiga xaqiiqo raadinta, waxayna ku tilmaantay baaritaankaas mid “dhinac u janjeera”. Waxaa intaa dheer, Soomaaliya waxay guddiga ku eedeysay inay iska indho tireen codsigoodii ahaa inay yimaadaan dhulka Soomaaliya, iyagoo labo jeer booqasho ku tagay dhulka Kenya, taasoo keentay in Soomaaliya ay ku hanjabto inay ka bixi doonto IGAD, iyadoo ku andacoonaysa in IGAD ay la safatay Kenya.

Janaayo 25, 2021, waxaa mar kale dhacay dagaal dhiig badan ku daatay oo u dhaxeeyay kooxaha iska soo horjeeda ee ku sugan Gedo. Isku dhacani wuxuu ahaa mid aan caadi ahayn. Maleeshiyada Cabdirashiid Janan iyo ciidamada Jubaland ayaa abaare 2-dii habeenimo weerar ku qaaday magaalada Balad Xaawo. Si ka duwan dagaaladii hore, dagaalkan ayaa waxa uu ka dhacay gudaha magaalada xilli qof walba uu hurdayay. Markii hore, Cabdirashiid Janan iyo ciidamadiisa waxaa u suurtagashay in ay la wareegaan gacan ku heynta magaalada, balse waxaa dib u riixay ciidamada dowladda federaalka kadib rasaas culus oo saqdii dhexe la is weydaarsadey. Kow iyo toban qof ayaa ku dhintay dagaalkaas oo habeenimo ahaa, waxaana ku jiray shan caruur ah oo hal qoys kasoo jeeday. 100 ka mid ah ciidamadii Cabdirashiid Janan ayaa sidoo kale nolosha lagu qabtay tobannaan kalena waa la dilay. Tani waxa ay dhabar jab weyn ku noqotay damacii Jubaland ee ahaa inay dib ulasoo wareegaan gacan ku heynta Gedo. Waxay ku guuldareysteen isku daygii labaad oo ay muddo sanad ka yar gudihiisa ku doonayeen inay ku qabsadaan hal magaalo (Hiiraan, 2021).

Dowladda Federaalka iyo Gedo

25-kii bishii Maarso 2021, Cabdirashiid Janan oo ahaa Wasiirka Amniga Jubaland iyo maleeshiyadiisa ayaa iskusoo dhiibay ergo ka socotay dowladda federaalka ah, oo uu hoggaaminayay wasiir ku xigeenka warfaafinta Cabdiraxmaan Alcadaala. Cabdirashiid Janan ayaa sheegay in uu iskusoo dhiibay sababo la xirriira xaaladaha qallafsan ee dadka reer Gedo ay wajahayeen oo ay kamid yihiin abaaro, cuduro iyo caabuqa COVID-19 (VOA Somali, 2021). Dowladda federaalka ayaa waxaa la sheegay in Cabdirashiid Janan ay u ballan qaadday in laga cafin doono eedeymaha loo heystay. Isla maalintaas, madaxweynaha Jubaland ayaa jagada Wasiirka Amniga Jubaland ka ceyriyay Cabdirashid Janan kadib markii uu u goostay dowladda federaalka, islamarkaana uu ku guuldareystay inuu ka guul gaaro ujeedooyinkii loo igamday ee Gedo.

Dhanka kale, dadka degmooyinka gobolka Gedo ayaa kusoo dhaweeyay heeso waani ah warka la xiriira isasoo dhiibidda Cabdirashiid Janan. Dad badan oo magaalooyin kala duwan jooga oo dhibaatooyin kala kulmay weerarradii Cabdirashiid Janan uu ku qaaday gobolka ayaa aad ugu farxay arrinkiisa. Dad badan ayaa sheegay sababta ay dadku u faraxsanaayeen kaliya ay aheyd in dagaalkii dhamaaday. Hase ahaatee, qaar kale ayaa weydiin ka keenay sida loogusoo dhaweeyay sida halyeey oo kale isagoo dadkiisa weerar ku ekeeyay xilli habeennimmo ah oo abaar daran ay jirto, taasoo sababtay barakac baahsan. Marka uu yimid Muqdishu, Cabdirshiid Janan waxaa laga cafiyey eedeymihii ay usoo jeedisay maxkamadda gobolka Benadir, laakiin weli waxaa eedeyn u heystay dowladda federaalka iyo haya’dda Amnesty International. Sida Somali Public Agenda ay kasoo xigatay ilo xog-ogaal ah oo ay la hadashay, dowladda federaalka ayaa qoraal ay u dirtay Amnesty International ku sheegtay in ay ka cafisay eedeymihii ay u heysatay Cabdirashiid Janan. Arrintan waxa ay muujinaysay sida dowladda federaalka u adeegsatay nidaamka garsoorka si ay cadaadis siyaasadeed u saarto Janan si uu dowladda ula shaqeeyo. Maalmo kooban kadib, Cabdirashiid waxa uu u duulay Turkiga isagoo aan cabsi ka qabin haya’daha fulinta ee qaanuunka caalamiga ah.

Markii uu Muqdisho kusoo laabtay Oktoobar 2021, Cabdirashiid Janan waxa uu ku dhawaaqay in uu yahay musharrax u taagan kursi baarlamaan. Waxa uu sheegay in uusan mar dambe qori qaadan doonin oo uusan xukunka ku raadin doonin qaab gacan ka hadal ah.

Intaa kadib, dowladda federaalku waxay si buuxda ula wareegtay gacan ku haynta Gedo (marka laga reebo Ceelwaaq) kadib markii Cabdirashiid Janan uu isasoo dhiibay. Dowladda federaalka ayaa sidoo kale dhammaan maleeshiyaadkii Janan ku biirisay ciidamada dowladda federaalka, iyadoo la siiyay dareeska ciidamada, lagana diiwaangeliyey ciidamada milateriga Soomaaliya si loo hubiyo in Jubaland aysan mar dambe ka faa’iideysan.

Dowladda federaalka waxa ay ciidan kumannaan ah u daabushay Gedo, si ay uga go’doomiso maamulka Jubaland intiisa kale. Sida ay sheegayaan dadka wax odorosa, qorshaha waxa uu ahaa ayadoo weerar laga qaadayo Gedo, taageerana laga helayo Itoobiya, in gacanta lagu dhigo magaalada Bu’aale oo ah caasimadda Jubaland, taasoo ay hadda gacanta ku hayaan al-Shabaab, islamarkaana doorashada madaxweynaha Jubaland halkaas lagu qabto. Arrinkan ayaa waxa uu soo dedejin lahaa dhismaha maamul garab socda kan Jubaland, si cadaadis loogu saaro Axmed Madoobe in uu tanaasulo. Hase ahaatee, qorshahaas ayaan miradhal noqon.

Kenya iyo Itoobiya, oo dhowr mayl u jira magaalada xuduudda ee Balad Xaawo, ma aaney iska fiirsan dhinacyada isku hayay arrimaha gobolka Gedo. Nairobi ayaa garab istaag u sameysay madaxweynaha Jubaland Axmed Madoobe, halka Addis Ababa ay garab taagtay dowladda federaalka. Xaaladda Gedo ayaa noqotay mid aad madaxa iskugu jirta oo lakabyo isa-saaran leh, kuwaasoo ka dhashay awoodaha gadaal ka riixaya dhinacyada is haya.

Gedo iyo Jahwareerka Doorshooyinka Federaalka

Kadib kulamo isbadajoog ah oo bartamihii 2020-ka ka dhacay Dhuusamareeb, dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah ayaa magaaladda Muqdisho isku afgartay hannaan doorasho dadban bishii Sebteembar ee sanadkaas. Hannaankan doorasho ayaa waxaa markii dambe kulan wada jir ah ku meel mariyay labada aqal ee baarlamaanka. Marka la eego habka doorsho oo ay isku afgarteen Golaha Wadatashiga Qaran kowdii Oktoober 2020, Garbahaarey ayaa loo asteeyay in ay noqoto deegaan doorashada 16 kursi oo kuraasta aqalka hoose ah.

Tan iyo markii uu billowday khilaafyada la xiriira doorsharada Soomaaliya, Gedo waxa ay noqotay gobolka ugu hadal-heynta badan. Sababo kala duwan awgood ayaa Gedo waxa ay u noqotay mowduuc doodo badan dhalliyay. Madaxweyne Farmaajo iyo xulufadiisa Gedo ayaa waxa ay ugu talagaleen in ay ayaga kaliya soo xulaan xubnaha metelaya kuraasta Gedo. Dhanka kale, madaxweyne Axmed Madoobe, oo xilka ku qabtay doorsho muran xooggan dhalisay, dowladda federaalkuna diiddaneyd oo bishii Agoosto 2019-ka ka dhacday magaalada Kismaayo, ayaa doonayay in uu kuraasta Gedo gacanta ku dhigo. Ujeeddada uu ka lahaana waxa ay aheyd in uu Gedo dib u hoos keeno maamulkiisa isagoo u maraya maamulka kuraasta baarlamaanka. Labada dhan ee iksu hayay Gedo, midkoonda ma dooneyn in uu u tanaasulo kan kale.

Dad badan ma aanay heysan faham ku saabsan dareenka dhabta ah ee dadka Gedo iyo sida ay u doonayaan in loo mareeyo doorashada 16-ka kursi ee gobolka taallay. Dadka ayaan awood u laheyn in ay wax badan ka dhahaan waxa ka socday gobolkooda. Waxaana aad u koobneyd in dadka gobolka ay ka daba hadlaan ciidanka gobolka jooga. Waana sababata dadka intooda badan ay uga aamuseen arrimha la xiriira doorashadan, iyadoo kuraastooda ay ku loollamayeen dhinacyo kale.

Raysal Wasaaraha dowladda federaalka, Maxamed Xuseen Rooble, ayaa isku dayay inuu xalliyo arrinka Gedo. Waxa uu u safray Kismayo, kadibna Garbahaarey bartamihii 2021-ka si uu wadatashiyo ula yeesho dhinacyada kadib heshiiskii 27-ka May 2021 ee Golaha Wadatashiga Qaran, kaasoo lagu heshiiyay in xafiiskiisa uu qaato hoggaanka amniga iyo dib-u-heshiisiinta gobalka (Abdullahi & Wasuge, 2021). Iyadoo la fulinayo heshiiska Golaha Wadatashiga Qaran, Raysal Wasaaraha ayaa u magacaabay guddi heer wasiir dowlad goboleed ah arrinta Garbahaarey, si loo xoojiyo dib-u-heshiisiinta, loo dhageysto tabashada dadka gobolka Gedo, islamarkaana la socdo magacaabista hoggaanka degmadda Gabahaarey.

Isla dowldda federalka ayaa xagal-daacisay horumarradii la sameeyay, taasoo ay ugu wacan tahay qeyb ahaan khilaafka soo kala dhex galay Madaxweynaha iyo Raysal Wasaaraha. Dowladda federaalka ayaa ciidamo dheeraad ah u dirtay Garbahaarey si ay u adkeeyso gacan heynteeda kadib markii guddigii raysal wasaaruhu magcaabay uu kasoo laabtay Gedo. Sidoo kale, waxa ay Muqdisho ugu yeereen guddoomiyaha gobolka Gedo, ayagoo geliyey xabsi-guri. Cusmaan Nuur Xaaji (Mucallimu) ayaa markii dambe xilka laga qaaday, isagoo lagu eedeeyay inuu gudan waayay shaqadiisa. Axmed Buule Garaad ayaa markii dambe loo magacaabay guddoomiyaha gobolka, iyadoo la adeegsanayo wasiir ku xigeenkii hore ee wasaarada arrimaha gudaha Jubaland. Isku shaandheyntan cusub ayaa dad badan waxa ay u fasirteen in looga dan lahaa dedaallo lagu adkeynayay sidii Gedo looga saari lahaa saameynta maamulka Jubaland.

Raysal Wasaaraha dowladda federaalka ayaa xilka ka qaaday Cabdullahi Kulane, oo ahaa ku xigeenka Haya'da Nabad-sugidda iyo Sirdoonka Qaranka iyo sarkaalka uga madaxda ahaa NISA gegida diyaaradaha Muqdishu bishii Julaay 2021, kadib markii ay ka dhega adeegeen amarkiisii ahaa in aan qofna laga horistaagi karin in uu dalka meel kamid ah u duulo. Dhacdadan ayaa kusoo beegantay kadib markii Kulane isku dayay in uu is-hortaag ku sameeyo guddoomiyihii hore ee gobolka Gedo Cusmaan Nuur Xaaji (Mucallimuu), oo u duuli lahaa Garbahaarey. Mucallimu oo xabsi guri ugu jiray Muqdisho, oo xilkiina laga qaday, ayaa doonayay in uu Gedo u tago si uu olole doorshada kuraasta taallay Gedo ee baarlamaanka uga sameeyo (VOA Somali, 2021).

Iyadoo horumar iyo heshiis muuqda aan laga gaarin doorshada 16-ka kursi ee aqalka hoose ee Gedo in lagu qabto la qorsheeyay, ayay dowlad goboleedyada soo gunaanadeen doorashada xubnaha golaha shacabka, marka laga reebo Hirshabeelle. 14-kii Abriil ayaa la dhaariyay inta badan xubnaha labada aqal. Saacado kadib dhaarinta, Guddiga Hirgellinta Doorashooyinka Heer Federaal ayaa ku dhawaaqay in 16-ka kursi ee Gedo aan lagu dooran karin Garabahaarey, doorashaduna ka dhici doonto Ceelwaaq, degmadda kaliya ee Gedo ka trisan oo ay maamusho Jubaland. Arrinkan ayaa waxaa soo dhaweeyay Raysal Wasaaraha iyo madaxweynaha Jubalanad.

Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Dowlad-goboleed ee Jubaland ayaa kadib soo saaray warqad ay ku caddeeyeen in doorashadda 16-ka kursi ee Ceelwaaq la qaban doono inta ka dhexeysa 18 iyo 27 Abriil. Siyaasiyiinta gobolka Gedo oo uu ku jiro Cabdullahi Kulane, oo hadda kamid ah xildhibaannada cusub, ayaa kasoo horjeestay in deegaan doorashada Garbahaarey loo wareejiyo Ceelwaaq. Maamulka Garbahaarey ayaa sidoo kale sheegay in doorasho barbar socota tan Ceelwaaq ay sameyn doonaan.

Ceelwaaq waa magaalo yar oo ku taalla xuduudka Soomaaliya iyo Kenya. Labo caqabad ayaa ku hor gudban in deegaan doorashada loo wareejiyo Ceelwaaq. Midda koowaad waa heshiiskii doorashada 17-kii Sebteember oo ay labada aqal ee baarlamanku meel meelmariyeen, madaxweynuhuna saxiixay. Heshiiska kuma jirin waxa la sameyn karo haddii loo baahdo in la beddelo deegaan dooshada lagu heshiiyay iyo habka loo beddelayo haddii caqabado muuqda ay is-hortaagaan in doorashadu ka dhacdo mid kamid ah deegaan doorashaayinka la asteeyay. Arrinkan waxa uu si toos ah caqabad xagga sharciga ah ugu yahay u wareejinta deegaan doorashada ee Ceelwaaq. Midda labaad, Ceelwaaq waa magaalo yar oo xuduudka Soomaaliya iyo Kenya ku taal, umana diyaarsaneyn martigelinta doorasho. Sidaas awgeed, dadka qaar ayaa shaki gelinaya in Ceelwaaq ay martigelin karto siyaasiyiin iyo ergooyin doorsho, haddii tartanka la furayo.

Iyadoo ay caqabadahan jiraan, haddana xubnaha guddiga doorashoyinka ee heer federaal iyo heer Jubaland waxa ay labo maalmood kusoo gebagabeeyeen doorashada 16-ka kursi ee Ceelwaaq. Dhanka kale, hannaan barbar socda midkaas oo ay hoggaaminayeen xubno katirsan guddiga doorashada heer federaal ayaa ka billowday Garbahaarey. Bisha Abriil 25-keeda, 32 xildhibaan oo lagu kala doortay Ceelwaaq iyo Garbahaareey ayaa waxaa shahaadoyin Muqdisho ku siiyay xubno katirsan guddiga doorashada heer federaal, iyagoo sugaya dhaarinta golaha shacabka.

Gedo waxa ay shaki la'aan ka mid tahay gobollada ugu dayacan gobollada Soomaaliya. Gacan bidxeynta gobolka ku dhacaday ayaa waxa u wehliyay dhibaatooyin kale. Abaaro soo laalaabtay, ayaxa, caaquba COVID-19, dagaallo, al-Shabaab, duqeynaha hawada ah ee Kenya ka geysato (Hornobserver, 2021), iyo hoggaan liita oo aan meteli karin dadka deegaanka ayaa ah qaar kamid ah waxyaabaha saameyay gobolka. Gedo ayaa waxa ay dhibane u noqtay hardan ka dhexeeya awoodaha gobolka oo danahooda u kala adeegsanaya siyaasiyiinta deegaanka. Dadka waxgalka ah ee deegaanka ayaa laga ilaaliyay in ay goobjoog ka noqdaan goobaha lagu go'aamiyo arrimaha gobolka.

Inkastoo kumannaan ciidan lagu daabulay gobolka Gedo saddexdii sano ee ugu dambeysay, haddana al-Shabaab ayaa gacanta ku heysa qeybo gobolka ka tirsan. Dhibaatooyinka gobolka ka jira awgood ayaa waxaa dib-u-dhac ku yimid mashaariic dhowr ah oo ay wadeen hay'ado maxalli iyo kuwo caalami ah. Hooyooyin badan ayaa ku geeriyooday qeybo kala duwan oo gobolka ah sababo la xiriira la'aanta adeeg caafimaad. Dhammaan isbitaallada waaweyn ee gobolka ayaa xeran sababo la xiriira khilaaf ka dhashay hay'adaha maamulaya isbitaalladaas. Arrimahan ayaa loo aaneynayaa waxtar la'aanta maamulka gobolka iyo fashilka ku yimid hoggaanka gobolka.

Waxyaabihii Ka Qeyb Qaatay Colaadaha Gedo

b. Tabashooyin aan La xallin

Dad badan ayaa ku dooda in saluugga Gedo ee kamid ahaanshaha maamulka Jubaland ay tahay mid ka dhalatay tabasho dhab ah. Tabashada Gedo ayaa ka dhalatay sinnaan la'aan ay la kulmeen beesha ugu badan gobolka Gedo xilligii doorashada maamulkaasi iyo sidoo kale tabashooyin ay ka qabaan duqeynta diyaaradaha dagaalka Kenya. Inkastoo ay dad badani ku doodayaan in hardanka beelaha Mareexaan iyo Ogaadeen uu soo jiray muddo tobannaan sano ah, haddana tabashada ay qabaan qaar ka tirsan beesha Mareexaan ayaa inta badan la fahamsan yahay in ay ka imanaayso in laga hor-istaagay in ay si cadaalad ah ugu tartamaan madaxtinimada maamulka Jubaland. Sidoo kale, Jubaland ayaa muujisay rabitaan la'aan in ay wax ka qabato weerarrada aan loo meel dayin ee Kenya ay ku hayso shacabka reer miyiga ah ee gobolka Gedo deggan.

Marka lagasoo tago duqeynta, Kenya waxay billowday inay dhisto derbi xuduudeed dhererkiisu yahay kumannaan kiiloomitir. Dadka Gedo ayaa mashruucan xuduudka ah ku macneeyay mid lagu doonayo in si xoog ah, sharcina aan ku salaysnayn, qeybo ka mid ah dhulka Soomaaliya lagu qaato. Taas waxa daliil u noqon kara, markii ay Kenya billowday dhisidda xayndaabka xuduudka Mandheera iyo Balad-Xaawo. Sida ay sheegeen dadka deegaanka, Kenya ayaa xuduudda Soomaaliya gudaha usoo gashay dhankeedana marsatay xaafad dhan oo ka tirsan degmada Balad Xaawo.

Maamulka Jubaland ayaanan ka hadlin duqeymaha iyo isbalaarinta ay Kenya ka waddo qeybo ka mid ah Jubaland. Waxqabad la'aanta Jubaland ee xadgudubka Kenya ayaa soo dedejisay tabashada dadka Gedo deggan ee Kenya iyo Jubaland. Intaa waxaa dheer, duqeymaha Kenya awgeed, qaar badan oo kamid ah dadka reer miyiga ah ayaa ka cararay deegaannadii ay ku noolaayeen.

Dilalka dadka kasoo jeeda beelaha Gedo ee magaalada Kismaayo ayaa mararka qaar lala xiriiriyaa maamulka Jubaland, halka qaarna loo masaafuriyay magaalada Muqdisho sababo la xiriira diidmadooda maamulka Jubaland. Maamulka Jubaland ayaa kala qeybiyay oo maamulay deegaannada Gedo balse horumar kumasoo kordhin. Waxaa intaa dheer in maamulka Jubaland ay aad u yartahay in uu la tashado wax-garadka Gedo ama uu u dhiibo xilal ay talada wax ku yeelan karaan. Taasi waxay keentay in maleeshiyo gacanta ku dhigto arrimihii gobolka oo ay ku metelaan reer Gedo miiska go'aan qaadashada.

Tabashooyinkan iyo kuwo kale oo is biirsaday ayaa dowladda Muqdisho ka caawiyay in ay dadka degaanka kiciso oo ay xaaladda ka faa'ideysato. Cuqaasha iyo wax-garadka Gedo ayaa aad uga xumaaday isku dayga aan laga fiirsan ee Madaxweyne Axmed Madoobe uu ku doonayo in uu kusii hayo xilka madaxtinimada Jubaland isagoo ku shubtay doorashada markii saddexaad. Waxay dareemeen in laga dhigay kuwo hoos yimaada qabiilka hoggaanka maamula haya halkii ay ka ahaan lahaayeen saamileey muhiim ah oo masiirka maamulka wax ku leh. Arrintaan waxay dhalisay in xubno katirsan 'Nabad & Nolol' oo ku xiran Madaxweyne Farmaajo ay Gedo tagaan dadka deegaankana ka horkeenaan Jubaland, sidaasna dhibco siyaasadeed ku helaan. Dowladda federaalku waxay u aragtay tani inay tahay istaraatiijiyad wax-ku-ool ah oo dhankooda u shaqeneysa.

t. Damac Siyaasadeed

Marka lagsoo tago cabashooyinka aan kor ugasoo hadalnay, waxaa sidoo kale jira fasiraadyo kale ee khilafyada Gedo. Damaca siyaasadeed waa arrin kale oo aan la dafiri karin oo sii hurinaysa khilaafka Gedo. Dowladda federaalka ayaa malaayiin doollar ku bixisay sidii gobolka Gedo looga jari lahaa gobollada kale ee Jubaland. Go'aankan waxaa uu ka dhashay hammigooda siyaasadeed ee ah inay gacanta ku dhigaan maamul goboleedyada xubnaha ka ah federaalka.

Marka lagasoo tago damaca dowladda federaalka ay ku dooneyso in ay gacanta ku dhigto Gedo, dadka reer Gedo ayaa iyaguna leh damac gaar ah oo ay ku doonayaan in ay ku qabtaan hoggaanka maamulka Jubaland. Cabdullaahi Kulane (oo hadda ah xildhibaan federaal) oo ah maskaxdii ka dambeysay duullaankii Gedo, iyo go'aankii madaxweyne Farmaajo ee ahaa in Gedo laga go'doomiyo Jubaland, ayaa damacooda waxaa u wehliya in ay sidoo kale maamul iyaga ka amar qaata ka dhisaan Jubaland.

j. La'aanta Hay'ado Amni ee Heer Dowlad Goboleed

Jubaland ma laha ciidamo loo dhan yahay – marka laga reebo dhowr boqol oo askari oo ka tirsan ciidamada Kaambooni ee beesha madaxweynaha Jubaland u dhashay oo ku kooban Kismaayo. Ciidamadan ayaa lagu eedeeyaa in ay si joogta ah u dhibaateeyaan dadka kasoo jeeda beelaha ugu waaweyn gobolka Gedo ee ku dhaqan magaalada Kismaayo.

Inta soo hartay waa ciidamada dowladda federaalka iyo qaar kamid ah ciidamo beeleedyo taabacsan siyaasiyiin gaar ah. Degmooyinka ka tirsan gobolka Gedo ma joogaan ciidamo ka tirsan Jubaland. Arrintan ayaa qeyb ahaan dowladda federaalka ka caawisay in kumannaan kamid ah milateriga federaalka ay geyso Gedo oo inta badan si dhib la'aan ah uga howlgala gobolka.

Talooyin Tixgelin Mudan

Khilaafka iyo loolanka doorashada 16-ka kursi ee baarlamaanka ee gobolka Gedo ayaa muhiimad gaar ah u leh maamulka Jubaland iyo sidoo kale waxgaradka Gedo iyo cid kasta oo daneyneysa arrimaha gobolka. Talooyinka ugu muhiimsan ee lagu xallin karo khilaafka Gedo iyo dariiqooyinka loo mari karo xasillooni waarta iyo isku duubni waxaa kamid ah:

1. Colaadda ka taagan Gedo waxa lagu baajin karaa in la sameeyo dib-u-heshiisiin dhab ah oo degdeg ah. In wax laga qabto tabashada reer Gedo iyadoo loo maraayo oday dhaqameedyada si loo dhameeyo khilaafka ayaa ka habboon in xalka qoray laga raadiyo. Xubnaha baarlamaanka Jubaland ee heer dowlad goboleed iyo heer federaal iyo wasiirrada waa in ay hormuud ka noqdaan dadaallada dhex dhexaadinta ee dowlad goboleedka Jubaland iyo gobolka Gedo, islamarkaana ay geeddi-socodka ka qeybgalaan qeybaha kala duwan ee bulshada Gedo.

2. Si loo baajiyo colaad kasta oo ka dhacda Gedo, waa in maamulka Jubaland ee hadda jira uu wax ka qabto tabashooyinka ay qabaan beelaha dega Gedo ee ku wajahan gardarrada iyo is-ballaarinta Kenya, iyagoo dowladda Kenya kula xisaabtamaya xadgudubka iyo magdhowga qoysaska ay dhibaatadu saameysey. Jubaland ma iska indha tiri karto duqeynta hawada ah ee lagu hayo dadka rayidka ah ee ku nool Gedo haddii uu rabo maamulka in uu xukunkiisa gaarsiiyo gobolka Gedo.

3. Maamulka Jubaland waa in uu sameeyo ciidamo loo dhan yahay oo ka kala socda beelaha dega Jubaland. Qaab-dhismeedka hay'adaha amniga Jubaland ee hadda waa mid hal beel u badan daacadna u ah Madaxweynaha Dowlad Goboleedka. Ciidamada isku-dhafka ah waa in la geeyo degmooyinka kala duwan ee Jubaland.

4. Maamulka Jubaland waa in uu daadajiyaa xukunka una dhawaadaa shacabka. Tan iyo markii la asaasay Jubaland sanadkii 2013, maamulka ma aanu sameynin isku day macno leh ee uu ku doonayo in uu xukunka ku daadajiyo. Daadejinta xukunka iyo adeegyadu waxay ahaayeen sababaha aasaaska u ahaa qaadashada nidaamka federaalka. Waa in uu maamulka Jubaland u oggolaadaa dadka deegaanka inay ka qeyb qaataan xukunka, dareemaanna in ay talo ku leeyihiin aayahooda, iyo sidoo kale in ay la xisaabtamaan madaxdooda.

Tixraac

Abdishakur, 2020. *BBC Somalia*. [Online] Available at: https://www.bbc.com/somali/war-51707728

Abdullahi, A. & Wasuge, M., 2021. From Agreement to Implementation: The Operationalization of Somalia's Indirect Election Agreement. *Somali Public Agenda,* Issue 13, p. 2.

Aljazeera, 2020. *Aljazeera News*. [Online] Available at: https://www.aljazeera.com/news/2020/12/15/somalia-cuts-diplomatic-ties-with-kenya-citing-interferences

Aljazeera, 2020. *Aljazeera News*. [Online] Available at: https://www.aljazeera.com/news/2020/12/15/somalia-cuts-diplomatic-ties-with-kenya-citing-interferences

Amnesty International, 2020. *Amnesty International*. [Online] Available at: https://www.amnesty.org/en/latest/news/2020/02/somalia-kenya-must-arrest-and-return-escaped-jubaland-minister-to-face-trial-in-mogadishu/

Hiraan, 2021. *Hiraan Online*. [Online] Available at: https://www.hiiraan.com/news4/2021/Mar/182071/abdirashid_janan_in_talks_with_federal_government.aspx

Hornobserver, 2021. [Online] Available at: https://hornobserver.com/articles/1032/Somalia-Children-wounded-by-KDF-airstrikes-in-Gedo-region-airlifted-to-Mogadishu-for-treatment

International Crisis Group, 2020. Ending the Dangerous Standoff in Southern Somalia. *Crisis Group Africa Briefing ,* Issue 158, pp. 5-7.

VOA Somali, 2021. *VOA Somali*. [Online] Available at: https://www.voasomali.com/a/5827760.html